

# Warbixin ku wajahan bukaanka COVID-19 awgii loo keenay isbitaalka

COVID-19 wuxuu keeni karaa xanuun yar, mid daranna wuu sababi karaa.

Waxaa laguu keenay isbitaalka caabuqa COVID-19 awgii sidaan u ilaalino neefsashadaada waxaa laga yaaba in loo baahdo in naqaskaaga lagu kabo oxygen ama laguugu xiro ventilator (makiinada naqaska/neefiye). Wuxaan kaloo kaa caawin doonaa wixii calaamado kale oo lagaa helo amaba kugu soo kordho.

Waraaqdan waxay kuu sharxi doontaa daawada lagu siin doono, iyo caawinaadda aad heli karto.

## Maxaa la iigu daawayn doonaa?

Inta ay socoto daawaynta lagula tacaalayo cudurkan waxaa muhiim ah in sidoo kale la yareeyo walwalka aad dareemi karto. Tani ayaa waxay suurto galinayaa daawaynta calaamadaha dheeriga kugu soo baxo sida :

- Neefyarida waxaa lagula tacaali karaa in lagu dajiyo. Hadii ay neefyarida kuugu sii xumaato waxaan ku caawin doonaa daawayn. Daawada ugu caansan oo loo isticmaalo waa morphine. In kastoo dawadan Morphine ay tahay xanuun baabi'iye islamarkaana waxaa loo isticmaalaa la tacaalida neefyarida.
- Qufaca waxaa sidoo kale lagu yarayn karaa morphine ka.
- Walwalka ayaa badan kara; daawoyinka lagu daaweyo walwalka waxaa ka mid ah lorazepam iyo midazolam
- Waxaa sidoo kale iman karta nasiino la'aan ay sababto qandhada. tani waxaa lagu xakamayn karaa isticmaalka dawada paracetamol.

Daawo waliba waxaa laguu siinaya si joogto ah iyo markii loo baahdo. Haddii aadan laqi karin daawada waxaa lagaa siinayaa xididka oo aad cirbad ahaan u qaadanaysid amaba maqaarka hoostiisa.

Xaalada Covid-19 ee daran wuxuu saameyn wayn ku yeelaa karaa sambabada waxayna sambabaha joojin karaan shaqadooda caadiga ah Waxaa dhici karta in makiinad naqaska kaa saacido/neefiye (ventilator) laguugu xiro si hawo loo gaarsiiyo sambabada oo lagaa caawiyo neefsashada. Wuxuu dhici karta inuu kuugu xirnaado neefiyaha dhowr maalin ilaa ay sambabada mar kale u shaqeeyaan si caadi ah.

## Ma go'aansan karaa sida la ii daweeynayo?

Kala hadal dhakhaatiirta wixii adiga kuu muhiimsan. Waxaa laga yaabaa Inaad doorbiddid xilliga la qaadanayo go'aanada qaar iyo sida loo qaadayo. Tusaale ahaan, xilliga loo baahan yahay in la bilaabo in laguugu xiro neefiyaha iyo markii loo baahan yahay wadnaha in la soo celiyo garaaciisa markuu istaago. Dhaktarku wuxuu tixgalinayaar aragtidaada iyo xaalka caafimaad ee aad markaas ku jirto. Go'aano degdeg ah baa loo baahan karaa in laga qaato daryeelkaaga caafimaad, marka waxaa aad muhiim u ah inaad la socodsiiso kooxda caafimaadka waxa aad rabtid inay sameeyaan. Hadii aadan hubin tilaabada la qaadayo , fadlan kala hadal kooxda caafimaadka.



Macluumaadkan waxaa isku daba ridday Dr Sabrina Bajwah (Cicely Saunders Institute, King's College London) waxaana si baaxad leh uga qayb qaataay qoraa kale iyo kooxo bukaano/daryeelayaal mataala si uu u raaco qoraalka tafatireed "maareynta baahida daryeel dadka uu saameeyay COVID-19". Please cite this editorial as follows:

Bajwah S, Wilcock A, Towers R, Costantini M, Bausewein C, Simon ST, Bendstrup E, Prentice W, Johnson MJ, Currow DC, Kreuter M, Wells AU, Birring SS, Edmonds P, Higginson IJ (2020). Managing the supportive care needs of those affected by COVID-19. ERJ: doi (10.1183/13993003.00815-2020)



Produced in April 2020

## **Sidee baan ula xiriir karaa dadka ii dhow?**

Waxaa jira xeerar kala fogaansho ee adag oo lagu soo rogay gudaha iyo banaanka isbitaaalka, taasi oo micnaheedu tahay in aysan suurtagal kuu noqon karin booqashada. Hadii lagu soo booqanayo, waxaa lagaa rabaa qofka kusoo booqanayo in ay xirtaan agabka ilaalinta shakhsiga (sida kale loo yaqaano PPE- marada wajiga lagu xirto iwm). Meeshii suurtagal ay tahay, waxay shaqaalaha qeypta (ward-ka) kaa caawin doonaan inaad la xiriirtid dadka xagga qadka taleefanka ama video. Fadlan la xiriir shaqaalaha ward-ka hadii aad raali ka tahay in macluumaadka gaarka kuu ah sidaan lagaaga gudbiyo iyo hadii ay jiraan cid gaar ah aad rabto in lagala xiriiro xaalkaaga.

## **Ma heli karaa caawinaad intaasi dheer?**

Waan fahmi karnaa inay tahay waqtii adag. Wuxaana laga yaabaa inaad rabto inaad dareenkaaga ka hadasho. Fadlan waydii shaqaalaha qeypta inay kugu xiriiriyaan adeegyada soo socda ee kuu banaan:

Liiska adeegyada caawinaad ee maxaliga ah: